Sidee Looga Qabsadaa Hawlaha Aad Dooneyso Maxkamadda Sare Ee Degmada King Mudada Covid-19 Marka Aadan Laheyn Qareen

Macluumaadka hoos ku xusan waa mid loogu talo galay inuu kaa caawiyo sida loo diiwaangeliyo maxkamadda dacwad sharci ah ama looga shaqeeyo dacwad horey u socotay mudada lagu jiro COVID-19. Waxaa dadweynaha lagu dhiirigelinayaa in **aysan** imaan dhismaha maxkamadda haddii ay suurogal tahay oo ay yimaadaan kaliya marka kaga codsado sidaas. Waxaa la idku caawin karaa iimeylka, barnaamijka Zoom, iyo telefoonka sidaa darteed looma baahna in aad timaadaan maxkamadda. Maxkmaddu waxa ay is ku meel gaar ah u bedeshay sida ay u qabato hawsha si loogu fududeeyo dadka ka qeyb qaadanaya dhageysiga maxkamadda iyaga oo guriga jooga.

Haddii aad tageyso dhismaha Maxkamadda Sare ee Degmada King, waxaa lagu farayaa in aad xirato af dabool, oo aad xaqiijiso in afkaaga iyo sankaaga aad daboosho si aad u yareyso fiditaanka COVID-19; taasi waa amar maxkamadeed; amarkaas ka akhriso halkan. Haddii aadan helin ogolaasho, oo diido in aad xirato af dabool, waxaa lagu fari doonaa in dibadda uga baxdo dhismaha maxkamadda shaqaaluhuna kuma caawinayaan, maadaama maxkamaddu is barbardhigeyso badbaadada shaqaalaha iyo dadka booqanaya maxkamadda. Af dabool waa lagu siinaya haddii aadan heysan.

Macluumaadka aad u baahan tahay intiisa badan waxa aad ka heli kartaa meelo kala duwan ee bogga internetka ee maxkamadda. Qoraalkan waa liis soo koobayaa dhamaan macluumaadka laga yaabo in aad u baahan tahay, isga oo ku siinaya mareeg aad ka gasho si aad u hesho xog dheeraad ah.

Guji mareegta (link) hoose si aad u aragto qoraalka aad dooneyso:

Macluumaad Ku Saabsan Sida Loo Codsado Amarka Kala Badbaadinta Ee Dagaal Dhex Mara Qoyska

- Furitaanka Dacwad
- Dhageysiga DVPO
- Dhageysiga Dhiibitaanka Hubka

Macluumaad la Xiriira Amarka Kala Fogeynta iyo Kuwo Kale ee Is Amaan Gelinta

Macluumaad ku Saabsan Dacwadaha Qoyska

- Sida Loo Helo Caawinaad
- Furitaanka Dacwadaha Qoyska

- Codsi Maxkamadda Loo Gudbiyo
- Dhameystir Dacwaddaada

Macluumaad Ku Saabsan Dacwadaha Wakiil Ka Noqoshada iyo Dhaxalka

Macluumaad ku Saabsan Mas'uul Ka Noqoshada

Sidee Loo Diiwaangeli ayaa Qoraalo Khuseeya Dacwad Maxkamadda ka Furan

Helitaanka Talo Xagga sharciga Ah

Amarka Kala Badbaadinta ee Dagaal Qoyska Dhex Mara (DVPO)

Furitaanka Dacwad:

1. **Sida Loo Helo Caawinaad** Haddii aad dooneyso in lagaa caawiyo Amarka Kala Badbaadinta Ee Dagaal Dhex Mara Qoyska (DVPO), waxa aad la xiriiri kartaa Barnaamijka U Dooda Amarka Kala Badbaadinta (POAP) ee:

    - Seattle 206-477-1103, or
    - Kent 206-477-3758.

    Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida lagaaga caawin akro POAP waxa aad ka heli kartaa halkan.

2. **Sida aad dacwad u furi karto:** Haddii aad dooneyso in aad codsato DVPO waxaa lagaa doonayaa:

    a. **In aad buuxiso foomamka:** Foomamka waxa aad kala soo bixi kartaa adiga oo ka raadinaya liiska aad ka heleyso halkan. Waa in aad liiska hoos u raacdaa ilaa aad ka gaarto bartamaha bogga oo guji Foomamka Amarka Kala Badbaadinta Dagaal Qoyska Dhex Mara ee liiska ku jira jadwalka liisaska.

    b.

    c. **Ka Diiwaan Geli dacwadaaada Nidaamka kombiyuutarada:** soo booqo xogheynta aad kula xiriiro habka kombiyuutarada ee DVPO (VIRUAL DVPO) halkan. Boggaas waxa aad ka heleysaan tilmaamaha doorashada, diiwaan gelinta, iyo soo gudbinta foomamka saxa ah. Waxaa suurogal in aad Xafiiska Xogheynta kula xiriir kartobarta internetka 9 aroonimo ilaa 4ta galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha (waa ay xiran yihiin 12 :15 – 1 :15 galabnimo xiliga qadada). Soo booqo xafiiska barta internetka ee

ZOOMDVPO. Haddii aad dooneyso in laga caawiyo isticmaalka ama la soo degidda Zoom, ama tilmaamo gaar ah oo ku saabsan sida loo isticmaalo ZOOMDVPO, **halkan** ayaad ka heli kartaa macluumaad dheerad ah. **Fadlan u fiirso :** Maxkamadda Sare ee Degmada xilligan **uma furna** dadka doonaya in ay diiwaan geliyaan amarka kala fogeynta ee degdegga ah. Dhamaan dhageysiyada waxaa lagu qabanayaa barta internetka iyada oo la isticmaalayo Zoom/telefoonka, Marka aad qoraalk u soo gudbiso xogheynta maxkamadda (barta internetka ama aad gacanta ka keento) waxaa lagu siinayaa macluumaadka aad u baahan tahay ee dhageysiga barta internetka ama telefoonka.

d. **Sidoo kale :** Xogheynta ku caawineysa kuma siin karaan talo xagga sharciga ah iyo sida loo buuxiyo foomamka: Haddii aad dooneyso caawinaad, la xiriir POAP (raac talaabada koowaad ee kor ku xusan) ama mid ka mid ah barnaamijyada la taliya dagaalka qoyska dhex mara ee ku xusan halkan.

e. **Tilmaamaha:** Tilmaan dheeraad ah ee sida loo diiwaangeliyo DVPO waxa aad ka heli kartaan halkan.

Dhageysiga DVPO*:* Dhamaan dhageysiyada DVPO waxaa lagu qabtaa Zoom, oo ay ka mid tahay Zoom oo telefoonka lagu qabto marka ay suurogal tahay. Tilmaamo ku saabsan sida looga qeyb qaato telefoonka waxa aad ka heli kartaan barta internetka sida soo socota:

1. **Dhageysiga 1aad:** Macluumaad ku saabsan sida looga qeyb qaato dhageysiga “degdegga ah” marka aad codsaneyso amarka kala badbaadinta ee cusub, guji halkan. Waxaa lagaa doonayaa in aad hoos u raacdo liiska maxkamadaha, iyo tilmaamaha ku saabsan sida looga qeyb qaato dhageysiga telefoonka kaliya. Haddii amar ku meel gaar ah ee kala fogeynta la ogolaado, dhageysiga kale ayaa la qabanayaa 14 cisho gudahood iyada oo maxkamadda qoysku ay dhageysaneyso.

2. **Dhageysiga Loo Dhan Yahay/Dib U Soo Noqashada**:, ***FIIRO GAAR AH* : dhageysiga noocan waxa uu ugu dambeynta laga soow aeejin doonaa in telefoonka lagu dhageysto, taasoo tilmaamaha sida looga qeyb qaato hoos lagu caddeeyey, si aad uga qeyb qaadato dhageysiga Zoom fiidyoow/telefoonka. Soo booqo bogga internetka ee maxkamadda xogtii ugu dambeysay ee nidaamka!** Taariikhda la joogo ee 12/23/2020 si aad uga qeyb qaadato dhageysiga buuxa/dib la isugu soo noqday DVPO waa in aad la xiriirtaa xogheynta maxkamadda qoyska ugu yaraan sadex (3) saacadood ka hor xilliga dhageysiga dacwadda adiga oo soo waca ama iimeyl ku soo dira magacaaga, lambarka dacwadda, taariikhda dhageysiga, iyo telefoon lambarka lagaala soo xiriiri karo.

    a. Dacwadaha Kent, iimeyl FamilyLawStaffMRJC@KingCounty.gov ama soo wac (206) 477-2750;

b. Dacwadaha Seattle, iimeyl FamilyLawStaffSeattle@KingCounty.gov ama soo wac (206) 477-1523.

Macluumaad dheeraad ah, guji halkan. Waxaa lagaa doonayaa in aad hoos u raacdo ilaa aad gaarto qeybta “Amarka Kala Badbaadinta Dagaalka Qoyska Dhex Mara.”

3. **Dhageysiga DhiibitaankaHubka:** Haddii ay maxkamad ku amartay in aad ka qeyb qaadato dhageysiga fulinta amarka, waa in aad telefoonka kaga qeyb qaadataa: **Ugu yaraan 1 maalin ka hor dhageysiga,** ku soo dir magacaaga, lambarka dacwadda, taariikhda dhageysiga, iyo telefoon lambarka lagaala soo xiriiri karo iimeylkan: weapons-surrender@kingcounty.gov. **Haddii aadan laheyn iimeyl**, **wac** (206) 477-1367 si aad ugu sheegto telefoonkaaga. Haddii aad fariin ku dhaafto, ku dhaaf magacaaga, lambarka dacwadda, iyo taariikhda dhageysiga.

Noocyada Amarada Kale ee Kala Badbaadinta

Marka laga tago Amarka Kala Badbaadinta ee Dagaal Qoyska Dhex Mara (DVPO), waxaa jira noocyo kale oo amarka kala badbaadinta ah, oo ay ka mid yihiin:

- Amarka Kala Badbaadinta ee Joojinta Qashqashaadda iyo Dabagalka,
- Amarka Kala Badbaadinta ee Galmoodka Dagaalka Wehliyo (SAPO),
- Amarka Kala Badbaadinta ee Dadka Nugul (VAPO), iyo
- Amarka Kala Badbaadinta Dadka Khatarta Ku Jira.

1. **Dulmar Guud:** Faahfaahin ku saabsan noocyada kala duwan ee amarada kala badbaadinta ka akhri halkan. waxa aad ka heli kartaa foomamka noocyada kala duwan ee amarada kala fogeynta halkan. Waxaa lagaa doonayaa in aad hoos u raacdo falaarta hoos u jeedda ee midabka casaan xigeenka ah (purple) oo aad ka doorato macluumaadka nooca amarka kala bdaabadinta ah ee aad dooneyso.

2. **Waa Kuma Amarka Kala Badbaadinta ee Ku Haboon Xaaladeyda?** Jaantuskan ayaad ku arkeysaa bartamaha bogga halkan oo kaa caawinaya in aad go’aan ka gaarto nooca amarka kala badbaadinta ee aad dooneyso. Qoraalkan waxa uu faahfaahinayaa talaabooyinka kala duwan ee aad mareyso si aad u hesho amarka.

3. **Tilmaan:** Faafaahin, sharaxaad, iyo dhamaan noocyada kale duwan ee foomamka waxa aad ka heleysaa http://protectionorder.org/.

   Dhageysiga Amarka Kala Badbaadinta ee Joojinta Qashqashaadda iyo Dabagalka, SAPO, VAPO, iyo Badbaadinta Dadka Khatarta Ku Jira, ee Amarka Amarada Maxkamadda Sare ee Degmada King, waxaa looga qeyb qaataa

telefoonka. Macluuamadka SEATTLE, fadlan soo booqo halkan. Macluumaadka KENT, fadlan soo booqo halkan. Ama waxa aad soo wici kartaa lambarada telefoonada hoos ku qoran Jimcaha ama Isniinta ka horeeya dhageysiga qaaliga loo xil saaray ee dacwadda, lambarka telefoonka iyo ERAYGA SIRTA AH ee dhageysiga. Seattle 206-477-1400; ama Kent 206-477-2600.

Dacwadaha Qoyska

"Sharciyada Dacwadaha Qoyska" waxaa ka mid ah furiinka, abuuritaanka ama wax ka bedelka waqtigu ilmaha la qaato, abuuritaanka booqashada waalidka ee ilmaha/diiwaan gelinta waalidka ilmaha dhalay, xaqiijinta waalidnimo, dib u dajinta, iyo abuuritaanka/wax ka bedelka lacagta ilmaha loo jaaro.

Sida Loo Helo Caawinaad:

1. **Xafiiska Adeegaha**: Adeegaha Xarunta Macluumaadka Sharciga Qoyska/Xafiiska Xarunta Macluumaadka Sharciga Qoyska ayaa:

   - Kaa caawin kara nooca dacwadaha sharciyada qoyska ee aad dooneyso in aad diiwaan geliso.
   - Kaa caawin kara nooca foomamka ah ee aad u baahan tahay.
   - Ku siin kara talo lacag la'aan ah oo ku saabsan dacwadaada ama codsiga aad dooneyso in aad diiwaan geliso.
   - Ku siin kara macluumaadka ku saabsan nidaamka maxkamadda, iyo
   - Kaa caawin kara in aad hesho foomamka xagga sharciga ah.

   Waxa aad la soo xiriiri kartaa inta u dhaxeysa 8:30 aroornimo ilaa duhurka, Isniinta ilaa Jimcaha.

   - Dacwadaha Seattle ama Kent, soo wac (206) 263-FLIC (263-3542).
   - Kani waa lambar cusub ee labada gooboodba; telefoonada ku soo dhaca lambarkii hore waxaa loo soo duwayaa lambarkan cusub..

   Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida aad ku heli karto caawinaad, guji halkan.

2. **Talo Xagga Sharciga Ah:** Guji halkan si aad u ka akhriso"Sida Aad Ku Heli Karto Talo Xagga Sharciga Ah.

Furitaanka Dacwadaha Qoyska :

1. **In aad buuxiso foomamka:**

   a. **Tilmaamaha:** U adeegaha Sharciyada Qoyska waxa uu ku daabacay barta internetka tilmaamaha ku saabsan inta badan dacwadaha qoyska. Tilmaamaha, xagga hoose waxaa ku xusan foomamka aad u baahan tahay. Tilmaamaha waxa aad ka heli kartaa halkan.

      Sidoo kale, waxa aad soo wici kartaa adeegaha wixii su'aal ah ee aad ka qabto tilmaamaha ama foomamka aad u baahan tahay. Macluumaadka halka aad kala xiriiri karto adeegaha waa halkan.

   b. **Kala Soo Bax Foomamka Barta Internetka:** Foomamka dacwadaha qoyska waxa aad ka heli kartaa halkan.

2. **Diiwaan Gelinta Dacwadda:**

   a. **Lagaa Dhaafo Lacagta**: Ka akhri tilmaamaha halkan haddii aad dooneyso in aad maxkamadda ka codsato in laga dhaafo lacagta diiwan gelinta si aad u furto dacwad cusub ee dacwadaha qoyska.

   b. **Iyada oo aan lagaa dhaafin lacagta:** Ka akhri tilmaamaha here haddii aad dooneyso in aad furto dacwad cusub ee qoyska iyada oo aan lagaa dhaafin lacagta diiwan gelinta.

Codsiyada Dacwadaha Qoyska

1. **Diiwaan Gelinta Codsiyada**: Ka dib marka aad diiwaan geliso dacwadda qoyska, waxa aad dooneysaa in aad maxkamadda ka diiwaan geliso codsi ay maxkamaddu soo saarto amar ku meel gaar ah oo dhaqan galaya ilaa ay dacwaddu ka dhamaato. Xilligan, maxkamddu waxa ay raacaan nidaam gaar ah codsiyada dacwadaha qoyska, sida uu dhigayo Amarka Degdegga ah ee 24. Tilmaamaha doorashada iyo taariikh u qabashada dawcawadaada qoyska waxa aad ka heli kartaa "Codsiga Qabashada Dhageysiga Dacwadda Qoyska" waxa aad ka heli kartaa halkan. Macluumaad dheeraad ah waxa aad ka heli kartaa halkan.

2. **Ogolaashaha Amarka Ku Meel Gaarka Ah:** Amarka kumeel gaarka ah ee la isla ogol yahay waxaa loo gudbin karaa maxkamadda si ay u ogolaato. Macluumaad ku saabsan sida amarada loogu soo gudbiyo barta internetka, ee "amarada sugaya in la eego" safka ku jira queue, ka akhri halkan. *Fiiro Gaar Ah*: amarada lagu isku raaco waa in ay saxiixaan labada dhinacba.

3. **Sidee Looga Qeyb Qaataa Dhageysiga Dacwadaha Qoyska**: Macluumaad ku saabsan sida looga qeyb qaato dhageysiga dacwadaha qoyska waxa aad ka heli kartaa halkan.

Dhameystirka Dacwadaha Qoyska :

1. **Dhageysiga Ugu Dambeeya:** Dhamaan dacwadaha ugu dambeeya ee qoyska laga soo bilaabo Maarso ilaa 10ka Luulyo waxaa dib loogu dhigay 20ka Luulyo ama wixii ka dambeeya. Haddii aan laguu soo dirin taariikh cusub oo dhageysiga la qabanayo, la xiriir qaaliga dhageysanaya. Magaca qaaliga dhageysanaya waxa aad ka heleysaa jadwalka dhageysiga ee lagu siiyey markii aad maxkamadda ka diiwaan gelisay ama dacwadda lagu soo gaarsiiyey. Xogheynta qaaliga waxa aad kala xiriiri kartaa judgename.court@kingcounty.gov, tusaaale ahaan, smith.court@kingcounty.gov. Dhageysiyo badan ayaa lagu qabanayaa barta internetka; qaaliga ayaa ku siinaya tilmaamaha sida aad uga qeyb galeyso.

2. **Heshiis La Gaaro:** Dacwadaha qoysku waxa ay ku dhamaan karaan heshiis la gaaro. Haddii aad is mataleyso oo aad dooneyso in dacwadda ay heshiis ku dhamaato, waa in aad heshiiska ugu dambeeya u soo dirtaan facilitators@kingcounty.gov. Adeegaha ayaa la xiriiraya qaaliga si loo dhameeyo qoraalada ama ku siinaya tilmaan ku saabsan talaabada xigta. Fadlan soo raaci iimeylka iyo telefoon lambarka lagaala soo xiriir karo. Haddii aadan iimeyl ku soo diri karin fadlan soo wac (dacwadaha Kent) Seattle) 206-263-FLIC (206-263-3542) inta u dhaxeysa8:30 aroornimo ilaa 12:00 duhurnimo..

3. **Marka Uu Dhinac Ka Maqnaado Dhageysiga** Waa marka aad maxkamadda weydiisato in dacwadda la soo af jaro ka dib marka aad caddeyso in dhinaca kale la gaarsiiyey warqadaha oo aysan wax jawaab ah ka bixin mudada sharcigu ogol yahay.
    a. **Haddii Uu Dhinaca Ka Soo Qeyb Galay Dhageysiga Laakiin Uusan Jawaab Qoraal Ah Ka Bixin Dawcadda:** Haddii uu dhinaca kale ka qeyb qaato dhageysiga, laakiin aan diiwan gelin Qoraal Jawaabta Dacwadda, waxaa ***waajib*** kugu ah in aad dhinaca kale gaarsiiso codsiga aad maxkamadda u gudbineyso oo ah in laguu xukumo. Codsiyada ay maxkamaddu kuu xukunto ***ee*** u baahan gaarsiinta dhinaca kale, waxa ay hoos tagaan jadwal kale oo maxkamaddu dhageysato 1:30 duhurnimo ee Jimcaha ee Madaxa Qaaliyada ee UFC. Ogeysiiska Taariikhda Dhageysiga ee Jadwalkaas waxaa laga heli karaa **HALKAN**. Xubnaha is matalaya waa in ay kala hadlaan adeegaha sida loola socdo dhageysiga noocan ah:
    b. **Haddii Dhinaca Kale Uusan Imaan Dhageysiga Ama AANU Diiwaan Gelin Wax Jawaab Ah:**

i. **Dacwadaha Qoyska Ee Aan Laba Dhinac Caruur Isu Dhalin:** Haddii dacwadaada qoyska aanay caruurtu qeyb ka aheyn, waxa aad soo gudbin kartaa codsi in laguu xukumo ah ***oo aan*** lagaa dooneyn in aad gaarsiiso dhinaca kale ee amarka degdegga ah la idinku kala fogeeyey adiga oo u soo gudbinaya Xogheynta Amarka Degdegga ah (guji mareegta (link). U soo gudbi codsigaaga Degdegga ah ***kaliya*** haddii dhinaca kale uusan sinaba uga qeyb qaadan dhageysiga.

ii. **Dacwadaha Qoyska Ee Aan Labada Dhinac Caruur Isu Dhaleen:** Haddii dacwadaada qoyska ay caruurta qeyb ka tahay, waxa aad soo gudbin kartaa codsi in laguu xukumo ah oo **aan lagaa** dooneyn in aad gaarsiiso dhinaca kale aad gaarsiiso Amarka dib u eegista .

Probates and Wills:

Dacwadaha noocan ah waxaa ka mid ah mas'uulka noqoshada oo wehliyo ama uusan wehlin dardaaran (dacwadaha gobolka oo dhan).

1. **Furitaanka Dacwad** Si aad u bilowdo dacwad cusub oo mas'uul ka noqosho ah, waxaa lagaa doonayaa furitaanka dacwad cusub oo Maxkamadda Sare ee Degmada King. Macluumaadka guud ee ku saabsan ee bilowga waxaa lagu faahfaahiyey halkan.

   FIIRO GAAR AH: Codsiyada mas'uul ka noqoshada ee ay ku jiraan dardaaran waa in *la soo raaciyaa dardaaranka asalka ah.*

2. **Ogeysiis:** Marka aad fureyso dacwad cusub, waxaa lagaa doonayaa in aad caddeyso haddii ay jirto cid xaq u leh in la wargeliyo codsigaaga.

   a. **Ogeysiis La'aan:** haddii aad fureyso dacwad cusub oo aan lagaa dooneyn in aad cid kale wargeliso, codsiga iyo qoraalada kale waa habka elektaroonigga ah (kombiyuuutarka)lagu soo gudbiyaa adiga oo adeegsanaya Habka Degdegga ah una soo gudbinaya Xogheynta (EPVC).

      Amarka Degdegga Ah ee Loo Soo Gudbiyo Xogheynta (EPVC): Macluumaad dheeraad ah waxa aad ka heli kartaa halkan adiga oo hoos u raaca, oo dooorta "Masuul ka noqoshada." Macluumaad guud oo ku saabsan EPVC ka akhriso halkan.

   b. **Ogeysiis:** Waa in aad codsataa in la qabto dhsgeysiga si aad u furto dacwad *la* gaarsiiyo oegeysiiska dhinacyada kale 10:30 aroornimo ee jadwalka amarka degdegga ah. Waxa aad codsan kartaa in la qabto

dhageysiga maalin kasta ee todobaadka 14 cisho gudahood ka dib marka aad maxkamadda iyo dhinacyada kale ee u baahan in la gaarsiiyo aad wargeliso. Dhamaan Dhageysiga telefoonka ayaa looga qeyb qaadanayaa sida ku cad halkan.

3. **Macluumaad Dheeraad Ah:** Goob tixraac ah oo aad ka heli karto faahfaahin ku saabsan nidaamka wakiilashada/dardaaranka iyo foomam lacag la'aan ah ee aad isticmaali karto www.kingcountyprobates.com, inkast oo aan wax laga bedelin si uu ula saanqaado xaaladdan cusub ee COVID-19.

Mas'uul ka Noqoshada

Dacwadahan waa kuwo lagu codsanayo in Maxkamaddu ogolaato mas'uul ka noqoshada qof aan u laheyn in uu naftiisa daryeelo.

1. Foomamka iyo Tilmaamaha: Maxkamaddu waxa ay diyaarisay bog laga heli karo foomamka, sida loo buuxiyo, iyo macluumaad kale oo faa'iido badan idiin leh oo dhamaantood aad ka heli kartaan halkan.

2. Furitaanka Dacwad: Macluumaadka guud ee ku saabsan ee bilowga waxaa lagu faahfaahiyey halkan.

3. Dacwadaha mas'uul ka noqoshada ee hantida qofku heystaa yar tahay waxaa suurogal ah in laga daayo lacagta diiwaan gelinta. Sdioo kale, magacaabidda shaqaale maxkamadda uga soo warbixiya qofka mas'uulka laga noqonayo (GAL) oo dawladuna bixiso kharashka. Macluumaad heeraad ah, guji halkan. Hoos u raac bogga oo dooro "Mas'uul ka noqoshada (Guardianships/Trusts)."

4. **Diiwaan Gelinta Warbixinta Sanadlaha Ah:** Dadka soo gudbinaya warbixinta sanadlaha ah ama warbixinada ee markii muddo la joogaba ee aan laga dooneyn in ay dhinacyo kale ama hay'ado kale wargeliyaan waxa ay warbixintooda u soo gudbin karaan Xogheynta iyaga oo adeegsanaya nidaamka Amarka Degdegga ah (EPVC). Macluumaad dheeraad ah, guji halkan.

Sidee Loo Diiwaan Geliyaa Dacwad Cusub Xilliga COVID-19

1. Haddii ay jirto dacwad horey u fureyd, ama aad jeceshahay in shaqaaluhu dacwad cusub koo furaan, dhawr siyaabood ayaad raaci kartaa:

a. **E-file (Ku soo diridda kombuutarka):** Maxkamaddu waxa ay idinku dhiirigelineysaa in aad ku soo gudbisaaan qoraalada habka elektaroonigga ah, ee lagu magacaabo e-filing. Tilmaamaha ku saabsan sida loo diiwaangeliyo ka akhriso here. Guji halkan si aad u gasho bogga e-file.

b. **Boostada:** Haddii aadan ku soo gudbin karin, waxa aad qoraalada dacwadda ku soo diri kartaa boostada adiga oo ku soo hagaajinaya xafiiska xogheynta ee maxkamadda ee loo xilsaray dacwadaada. Cinwaanka xafiiska xogheynta waxa aad ka heli kartaa halkan.

   Haddii aad dooneyso in laguu soo diro cadeyn muujineysa in warqadaaha maxkamadda laga diiwaan geliyey baqshada leh tigidka boostada iyo nuqul dheeraad ah oo qoraalkaaga aad maxkamadda ka diiwaan gelineyso. Nuqulka dheeraadka ah waxaa lagu dhufanayaa shaabadda "received" oo dib laguugu dirayaa baqshadda tigidhka aad bixisay. Hubi in aad ku qorto lambarka dacwadda bogga hore ee qoraal kasta ee aad dooneyso in la diiwaangeliyo. Warqadahaaga boostada ku soo dir sadex (3) maalmood ka hor waqtiga la ogol yahay si aad waqti u siiso ku filan oo maxkamadda looga diiwaan geliyo.

c. **Gacanta Ka Keenid:** Haddii aadan ku soo gudbin karin e-file, waxa aad warqadaha keeni kartaa dhismaha maxkamadda; cinwaanka xafiiska waxa aad ka heli kartaa halkan. COVID-19 dartiis waxaa laga yaabaa in lagu weydiisto in aad kala fogaataan, adiga oo warqadaha ku ridaya sanduuq loogu talo galay halkii aad qof shaqaale ah la kulmi laheyd. Haddii aad dooneyso in aad gacanta ka keento, waxaa jira calaamado kuu sharxaya talaabooyinka aad mareyso. Hubi in aad ka sameysato nuqul dhamaan warqadaha aad soo gudbiso, si aad meel u dhigato.

2. **Macluumaad dheeraad ah:** Tilmaamaha ku saabsan sida loo diiwaangeliyo ka akhriso here.

3. **Weydii Xogheynta:** Haddii aad qabto wax su'aal ah, waxa aad kula xiriir kartaa telefoonka, iimeyl ama habka fariimaha degdegga ah kula soo xiriir Xogheynta Maxkamadda Sare ee Degmada King. Guji halkan halka lagala soo xiriirayo.

Helitaanka Talo Xagga sharciga Ah & gargaarka

Inkasta oo barnaamijyada qaarkood ay yareynayaan in ay la kulmaan dadka, waxa aad heli kartaa gargaarka aad u baahan tahay, oo ay ka mid yihiin talada xagga sharciga ah, ee barnaamijyada hoos ku xusan. Fadlan u fiirso barnaamijyada waa kuwo ka madax banaan Maxkamadda Sare ee Degmada King, maxkamadduna ma damaanad qaadeyso in ay idin caawinayaan ama idiin fidin karaan caawinaad. Kuwa ma aha

barnaamijyada kaliya ee bixiya caawinaadda, waxaa la idinku dhiirigelinayaa in aad sameysataan baaritaankiina gaar ah meelaha aad ka heli kartaan caawinaad.

Maktabadda Sharciyada ee Degmada King

Kula xiriir Maktabadda Sharciyada ee Degmada King iimeyl, telefoon, ama barnaamijkooda “Zoom” adiga oo codsanaya adeegga ay bixiyaan Isniin ilaa Jimce 8:30 aroornimo ilaa 4:30 galabnimo. Shaqaalaha maktabadda sharciyada kuma siin karaan talo xagga sharciga ah laakiin waxa ay kaa caawin karaan baaritaanka sharciga ee aad dooneyso, foomamka, & tilmaamaha la raaco iyo in ay kuu diraan meelaha kale ee aad caawinaad ka heli karto. Adiga oo kaashanaya fiidiyoowga ku saabsn adeegooda, waxa ay kugu xirayaan adeegga Maktabadda Sharciyada ee WA oo kaaga jawaabaya su’aalaha aad qabto. Akhri https://kcll.org/ fursada aad kala dooran karto ee caawinaadda.

Foomamka: Maktabadda Sharciyada waxa ay leedahay dhawr adeeg “oo aad isu qaban karto” oo iib ah , kuwaas oo u qoran hab talaabo talaabo iyo **foomamka oo maran**. Maktabaddu waxa kale oo ay idiin daabaceysaa oo idiin soo direysaa iyada oo lacag yar la idinka qaadayo.

Fiidyoowga & Tababarada Maktabadda waxaa yaala fiidiyoow fara badan oo caawinaya dadka iyaga is matalaya sida ay uga qeyb qaadan lahaayeen dhageysiga iyo mowduucyada kale ee ay ka mid yihiin qoritaanka dardaaranka. https://kcll.org/videos/

Maktabadda sharciyada waxa kale oo aad ka heli kartaan tababaro ay bixinayaan qareeno oo mowduucyo kala duwan ah. Waxaa ka mid ah afar tababar oo horey loogu qabtay Dadka Is Matala Dhageysiga Maxkamadaha oo lagu soo bandhigay waxyaabaha aasaaska u ah dacwadaha madaniga ah iyo Dacwadaha Qoysaska ee dadka ka qeyb qaadanaya dhageysiga Dacwadaha Qoyska. Macluumaadka is diiwaan gelinta waxa aad ka heli kartaa: https://kcll.org/classesat-the-law-library/classes/self-represented-litigant-workshops/.

Barnaamijka Mashruuca Garsoorka ee Northwest

Mashruuca Garsoorka ee Northwest (NJP) waxa uu bixiyaa talo xagga sharciga ah, caawinaad, noocyada kala duwan ee u doodidda. Si aad uga qeyb qaadato barnaamijyadooda, oo ay ka mid tahay talo siin xagga telefoonka ah mudada lagu jiro COVID-19, guji halkan.

Xarunta Caawinaadda Washington: Qaar ka mid ah foomamka iyo sida loo buuxiyo waxa aad ka heli kartaan Xarunta Caawinaadda Washington: waxa aad ka heleysaan halkan. Bogga internetka ah waxa aad ka heleysaan “jadwal hoos u soo dhacaya” oo ay wehliyaan mareeg xambaarsan waxyaabaha aad xaqa u leedahay ee gaarka ku ah caafimaadka, guryaha, sharciyada qoyska, shaqaaleynta, iyo kuwo dheeraad ah.

Barnaamijka Ururka Qareenada ee Degmada King:

Ururka Qareenada ee Degmada King (KCBA) waxa ay bixiyaan barnaamijyo lacag ah oo kala duwan. Macluumaadkii ugu dambeeyey, guji halkan.

Talo Guud oo Xagga Sharciga Ah iyo Caawinaad Qoraalada Dacwada Ah: Adeegga Sharciga ee xaafadaha waa adeeg lacag la'aan ah oo talo lagu siiyo lagana caawiyo qoraalada dacwadaha madaniga ah (ma aha fal damyeedka(. Waxaa lagula soo xiriiri karaa telefoonka mudada COVID-19. Waxa aad ka soo wici kartaan (206) 267-7070 oo ku dhaaf fariin. Shaqaalaha KCBA ayaa kula soo xiriiraya oo kuu sameynaya balan kombiyuutarka kula kulmi karto. Waxa ay xilligan muhimadda saarayaan dagaalka qoyska dhex mara (DV), iyo heyb sooca (shaqada, da'da, macaashka dawladda dhexe, iwm). Macluumaad dheeraad ah waxa aad ka heli kartaa halkan.

Talo Xagga Sharciga Ah Iyo Caawinaad Dacwadaha Qoyska Ah: Waxaa intaas dheer in Adeegga Xaafadaha ee KCBA uu leeyahay barnaaijyo kala duwan ee dacwadaha qoyska haddii ay rabshado wehliyaan; waxa aad soo wici kartaa KCBA ee (206) 267-7047, oo ku dhaaf fariin, qof shaqaale ah oo ka tirsan barnaamijka qoyska ayaa ku soo wacaya.

Talo Xagga Dadweynaha Ah: Waxa kale oo KCBA bixisaa **Barnaamijka Cadaaladda ee Guryaha (HJP)**, kaasoo telefoonka kula taliya dadka ay heystaan dhibaato la xiriirta guryaha ama laga saaro guryaha. Inkasta oo nbooqshada dadka ee barnaamijka HJP iminka la joojiyey, waxa ay kula soo xiriiri karaan telefoonka iyaga oo soo wici kara (253) 234-4204. Ku dhaaf fariin shaqaalaha HJP ayaa kugu soo celinaya. Iyada oo telefoonka lagula xiriirayo, HJP waxa ay caawisaa dadka doonaya in ay ka jawaabaan dacwad lagu soo oogay, loo soo diray dhageysi maxkamadeed, ama arrimaha kale ee la xiriira sharciga. HJP waxa kale oo idin kala talin kartaa barnaamijyada kale ee aad ka heli kartaan caawinaad. Inkasta oo gobolka oo dhan uu ka jiro in aan dadka laga saari karin guryaha, HJP waxa aad ka heleysaan macluumaad la xiriira waxa arrintaas loola jeedo. Macluumaad dheeraad ah waxa aad ka heli kartaa halkan.

Barnaamijyada Shaqo La'aanta iyo Adeegga Macaamiisha

Mashruuca Sharciyada Shaqo La'aanta macluumaadka waxa aad ka heleysaan barta internetka halkan ee la xiriira shaqaaleynta (shaqada lagasaaray, **helitaanka ceymiska shaqo la'aanta**, iwm.), waxa kale oo aad ka soo wici kartaa (206) 441-9178, ama telefoonka 1-888-441-9178.

Xarunta Northwest Ee Sharciyada Macaamiisha waxa aad ka heleysaan macluumaad la xiriira xarumaha sharciga iyo tabarada la xiriira **ururinta deynta, falasaadda, guryaha la xaraasho, guryaha laga saaro, iyo deynta ardayda** mudada lagu jiro COVID-19 oo aad ka heli kartaan: halkan.

Macluumaadka Wakiilashada/Dardaaranka

Maktabadda Sharciyada ee Degmada King waxa aad ka heleysaan laba fursadood oo “Foomamka iskiin u buuxsan kartaan”
oo iib ah; mid waa furitaanka dacwad Wakiilasho ah oo Dardaaran ku jiro midda kalana waa Wakiilasho aan Dardaaran ku jirin.
Dhamaantood waxaa laga heli karaa: https://kcll.org/probate-packets/. Maktabaddu waxa kale oo aad ka heleysaan
Fiidiyoow gaaban, macluumaad iyo xog ku saabsan su’aalaha inta badan la si weydiiyo ee Dardaaranka ee
Washington, ee https://kcll.org/covid-wills/.

Goob txiraac ah oo aad ka heli karto faahfaahin ku saabsan nidaamka wakiilashada/dardaaranka iyo foomam lacag la'aan ah waa www.kingcountyprobates.com, inkast oo aan wax laga bedelin si uu ula saanqaado xaaladdan cusub ee COVID-19.

Fadlan kala soco barnaamijayada kala duwan bogooda internetka wixii isbedel ah ee ku soo kordha inta lagu jiro xaaladda COVID-19